# BAASKIIL WADIS

Region of Waterloo

TRAVELwise
Bus, bike, walk, rideshare!

Bike WR

Safarrada ka hooseysa toban kiiloomitir, baaskiil qaadashada ayaa badanaa ah hab-safrida ugu dhakhsaha badan. Baroxoriyada iyo madaxbanaanida ay baaskiil wadista siiso dadka da' kasta leh!

Isku day inaad firfircoonaatid maanta adiga oo baaskiil shaqada ku aadayo ama hawlo ku qabanayo. Hawlaha jirka ee maalinlaha ah waxay kaa caawinayaan joogtaynta heerka dhisnaanta jirkaaga waxayna kaa caawin karaan ka hortaga cudurka wadnaha iyo sonkorta



**Khariirada Google ka hel jahaynta baaskiil wadista.** Qorshee jidkaaga adiga oo riixaya "get directions" ka dibna riix calaamada baaskiilka. Waxaad heli kartaa jidadka, wadooyinka iyo wadiiqooyinka baaskiilka ee aaggaaga.

**Looma baahno suraawiisha gagaaban ee baaskiilka.** Qof kasta ayaa baaskiil wadi kara! Waxaad ku wadi kartaa xawaare raaxo leh adigoo xiran dharkaaga caadiga ah.

**Bas kasta oo GRT ah wuxuu leeyahay qayb baaskiil lagu raro.** Haddii qaybta alaabta lagu raro ay buuxsanto, laba baaskiil ayaa sido kale la gelin karaa gudaha baska hadii nafis jiro.

Booqo www.grt.ca si aad u barato sida loo isticmaalo qaybta baska ee alaabta lagu raro.

**Baaskiilkaaga saar ION.** Baaskiilada waxaa loo oggol yahay tareenada Ion haddii nafis jiro. Fadlan xajiso baaskiilkaaga wakhti kasta.

## Xeerarka Wadada

Ontario gudaheeda, baaskiiladu waa baabuurta iyo baaskiiladu waxay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la mid ah wadayaasha baabuurta. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg bogga Badbaadad Baaskiilka ee Wasaarada Gaadiidka halkan www.mto.gov.on.ca.



Si carruurta loo siiyo fursad ay ku horumariyaan xirfadaha lagama maarmaanka u ah wadista baaskiilka, baaskiilada leh wareeg cag ooah 50 sentimitir am aka yar ayaa lagu wadi karaa geeska wadada laakiin waa in gacanta lagu mariya isgoysyada.

**Si aad u dhisto kalsoonida qoyskaaga, qaado koorsada CAN-BIKE!**
Booqo www.canbikecanada.ca so aad u heshid koorsad kuu dhaw.

**Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo bogga Baaskiil Wadista ee Gobolka Waterloo:**
www.regionofwaterloo.ca/cycling
519-575-4400



TRAVELwise

Bus, bike, walk, rideshare!

Region of Waterloo

# Talooyinka baaskiilka iyo xeerarka wadada




## Wada ku wadista

- Hal saf oo dhinac gaadiidka u socdaan ah ku wad hadii aan si kale lagu farin
- Ku wad meel hal miitar u jirto geeska jidka si aad iskaga ilaaliso biraha iyo qashinka
- Baaskiilkaagu waa inuu lahaadaa iftiin cad oo hore iyo iftiin cas oo dambe ah ama nal-bixiye markaad habeenkii wadaysid
- No mid la saadaalin karo – ku wad wada toosan oo baaq bixi markaad lexanayso
- Waa inaad raacdaa dhammaan calaamadaha iyo nalalka wada-socodka

## Ku wadista wadada duurka ah

- Ku wad dhinaca midig ee wadada duurka ah
- Ka istaag dadka lugaynayo una qaraac gambaleelka marka marayso
- Wa inaad ka dagtaa baaskiilka oo aad gacanta ku socodsiisaa markaad joogto isgoysyada

## Ku wadista meel u dhaw wadada tareenka fudud ee ION




- Eeg labada dhinaca oo ka gooy wadada kaliya goobaha loogu talagalay
- Mar walba ka gooy wadada tareenka xagal quman si aadan u dhicin
- Marnaba wadada tareenka ha ku wadin baaskiil
- Kula dhaqan tareenada ION digniin la mid ah mida baabuurta kale

Printed on 100% recycled paper